



BE HEALTHY. BE SAFE. BE READY.

Barnaamijkan waxaa dhaqaalaha ku caawiyey:



Wixii faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan taakuleynta dadweynaha iyo si aad u hesho xafiiska kuugu dhow, booqo www.minncap.org

Si aad u hesho cajaladda dhiifiidhiiga barnaamijkan la soo xiriir: www.minncap.org

Wixii faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan waxqabadka ECHO kala soo xiriir:

Lillian McDonald, *Executive Director*
c/o Association of Minnesota Counties
125 Charles Avenue, Saint Paul, MN
651-789-4342

info@echominnesota.org
www.echominnesota.org

Taakuleynta Dadweynaha Minnesota

Caawinta dadweynaha, horumarinta noloshooda.

Haddii aad tahay qof danyar ah, gobolka Minnesota waxaa ka furan 28 xafiis oo loogu tala galay Taakuleynta Dadweynaha oo la yiraahdo Community Action Agencies; xafiisyadaasi waxay u adeegaan gobolka oo dhan degmo kasta.

ECHO (Emergency, Community and Health Outreach) wuxuu ku faraxsan yahay inuu sameeyo show gaar ah oo taleefashinka laga soo saari doono oo ku saabsan adeegyada ay xafiisyada taakuleynta dadweynaha u diyaariyeen dadka danyarta ah ee ku nool gobolka oo dhan. Barnaamijkaas waxaa laga soo saari doonaa *tpt* Minnesota Channel, waxaana uu ku bixi doonaa afar luuqadood:

Axad 2-da Jannaayo: Axad 9-ka Jannaayo:

Spanish 7:00 p.m.

Af Soomaali 7-da fiidnimo

Axad 2-da Jannaayo: Axad 9-ka Jannaayo:

Hmong 7:30 p.m.

Af Ingiriis 7:30-da fiidnimo
(Shaashadda ku qoran)

Barnaamijkan waxaa laga heli doonaa macluumaad ku saabsan dhammaanba adeegyada kala duwan ee ay sameeyaan xafiisyada taakuleynta dadweynaha, sida Head Start, caawimaadda lacagta korontada, guryaha danyarta ee lagu dego qiimaha jaban, caawimaad ku saabsan in dadka guryahooda wax looga qabto si ay dugsi ugu noqdaan oo uusan kuleylku uga soo bixin, caawimaadda raashinka, adeegyada dadka waaweyn, tababar ka hadlaya sida lacagta loo dhaqaaleysto, waraaqaha canshuurta, iyo tababar shaqo.

Barnaamijka taakuleynta Minnesota ee *Community Action Minnesota* waxaa lagu duubay afar luuqadood, waxaana laga heli karaa www.echominnesota.org iyadoo af Ingiriis lagu soo qorayo shaashadda si ay u akhristaan dadka dhegaha la' iyo dadka dhegaha culus.

